# Xanaanada Caruurta Marka Aad Ka (Baxdo Barnaamijka MFIP)

Child Care After Going off MFIP (MFIP Transition Year Child Care)

## Maxay tahay xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka?

Sannadka Kala Guurka Xanaanadda Caruurtu waa Caawin Xanaano Caruurta ah oo aad heli karto ka dib kolka aad ka baxdo barnaamijka MFIP. In kastoo arrintan loogu yeero Sannadka Kala Guurka Xanaanadda Caruurta, waa aad isticmaali kartaa barnaamijkan ilaa iyo inta boos ka banaanaayo barnaamijka Khidmadda Aasaasiga ah ee Danta ku xiran, xataa hadii ay qaadato taasi muddo ka badan sannad. Waa aad heli kartaa Sannadka Kala Guurka Xanaanadda Caruurta **haddii**:

- MFIP ama DWP kiiskaaga ahi uu xirmay 12 kii bilood ee la soo dhaafay

- Aad qaadanaysay MFIP am DWP ugu yaraan 1 ka mid ah 6 dii biloood ee la soo dhaafay ka hor intii uusan kiiskaagu xirmin ***aadna***

- Shaqeysay 20 saacadood asbuucii ama ka badan aadna ku shaqeysay ugu yaraan lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo, aadna shaqo raadis tahay, **ama** aad iskuul dhigato. Qoyska 2-waalid leh, labadda waalidba waa inay ka soo baxaan shuruudahaa, aan ahayn in mid ka mid ah labadda waalidi uusan u hayn karin ilmaha sababo caafimaad awgood.

## Sidee u heli karaa xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka?



- Hadii aad hadda qaadatid gargaarka xanaanada caruurta. wac shaqaalaha xanaanada caruurta una sheeg in aada rabto in lagu siiyo Xanaanada Caruurta Sanadka kala guurka ah markaad ka baxdid MFIP.

- Haddii aadan hadda qaadan gargaarka xanaanada caruurta, weydii shaqaalaha maaliyadda ama la taliyaha shaqaalaynta in uu kuu codsado.

- Ma aha in aad isku filaatay markaad ka baxday MFIP, si aad u hesho xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka ah. Waad heli kartaa xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka ah, saba kasta oo aad uga baxdo MFIP oo aan ka ahayn in laga saaray ama aad been abuur/khiyaano samaysay.

## Ma heli karaa xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka ah annigoo dugsi dhiganaya?

Haa. Waa lagu siinayaa xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka ah haddii aad dhiganayso dugsi la aqoonsanyahay, ama aad tababar ku jirto. Tan waxaa ka mid ah fasalada GED, ESL, ama waxbarasho kuliyad. Waxaad heli kartaa gargaarka xanaanada caruurta saacadaha aad fasalka ku jirto, aad waddo shaqa ku tababarasho, ama waxbarasho madax banaan, ama aad dugsiga ku sii socotid ama ka soo soctid. Aradayda dhigata waxbarashada dugsiga sare wixii ka sareeya, waxay


heli karaan gargaarks xanaanada caruurta waqtiga ay wax baranayaan. Laakiin waa ay adkaan in lagu ganaaxo haddii aad ku jirto saamixida dhibanayaasha dagaalada qoyska dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro.

## Ma heli karaa xanaanada caruuta inta aan shaqo raadinayo?

Haa. Xanaanada Caruurta ee sannadka kala gurrka ah waxay ku siinaysaa xanaanada caruurta inta aad shaqada raadinayso – haddii aad u sheegto shaqaalaha qaabilsan xanaanada caruurta in aad shaqo raadinaysid. Waxaa jira waqti xadidan oo laguu ogolyahay inta aad heli kartid intaad shaqa doonka tahay.

## Waa imisa qimaha xanaanada caruurta ee sannadka kala guurka ?

Xanaanada Caruurta ee sannadka kala guurka waa xisaab is dhimaysa oo ku xirran dakhliga qoyska. Xisaabtaas is dhimaysa waxay la mid tahay sida ay isu dhimayso xanaanada caruurta ee barnaamijka MFIP. Haddii aad ilmaha gaysid meel lagu xanaaneeyo oo qaadata lacag ka badan inta ugu badan ee MFIP gobolku ay bixiso, farqiga addiga ayaa bixinaya. kharajku ma siyaadayo markaad ka baxdo xanaanada caruurta ee MFIP oo aad ku biirto Xanaanada Caruurta ee sannadka kala guurka.



## Maxay muhiim u tahay in aad hesho Xanaanada Caruurta ee sannadka kala guurka ah?

Qoysaka ku jira Xanaanada Caruurta ee Sannadka kala guurka ah waxay heli karaan kororsiimo haddii lagu daro liiska sugayaasha barnaamijka qiimaha asaasiga ah (sicirka jaban) ee caruurta lagu xanaaneeyo, marka sannadkooda kala guurku dhamaado.

Haddii aadan ku jirin Xanaanada Caruurta ee sannadka kala guurka ah waxaa lagugu dari karaa liiska sugayaasha si aad u hesho barnaamijka caruurta lagu xanaaneeyo ee qiimaha asaasiga ah (qiimaha jaban).

Qiimaha asaasiga ah wuxuu caawimaa qoysaaska dakhligoodu yaryahay oo aan ku jirin barnaamijka MFIP. Inta ay bixinayaan waxay ku xirantahay dakhliga qoyska – si la mid ah dadka ku jira xanaanada caruurta ee sanadka kala guurka iyo Xanaanada caruurta ee MFIP.

## Weli ma la iiga baahan yahay in aan uga warbixiyo shaqaalaha degmada wixii isbedel ah ee igu yimaada?

Qoysasku waa in ay saxaan wixii qalad ah ee la xiriira gargaarka xanaanada caruurta 12kii biloodba hal mar. Laakiin waxa jira waxyaabo la rabo in laga soo warbixiyo marka ay dhacaan. Ha la sugin warbixinta sanad laha ah wixii saxitaan ah:

Waxaad haysata 10 maalmood in aad ka soo warbixisid waxyaabahaan:

- Cinwaankaaga ama degaankaaga
- Xubnaha qoyska – haddii qof ka tegay, ama qof cusub ku soo biiray
- Haynta Ilmaha ama jadwalka booqashada
- Muwaadin nimada ama sharciga waddanka aad ku joogto
- Xaaladda Qoyska – sida wax is guursaday ama is furay, ama ilmo la dhalay
- Ilmaha oo dugsiga laga bedelay
- Cidda xanaanaysa ilmaha

Cidda xanaanaysa ilmaha waa in la soo sheegaa 15 ka hor isbeddelka.

Waxaa kaloo jira sharciyo la xiriira ka warbixinta dakhliga, ama shaqada, ama jadwalka dugsiga.

**Dakhliga:** qoysasku waa in ay ka soo warbixiyaan kororka dakhligooda ee gaarsiisan 85% wax ka badan dakhliga celceliska gobolka (SMI). Tirsia waxay ku xirantahay tirade qoyska. Waxaadka heli kartaa current chart (Jaantuska) ee www.dhs.state.mn.us. *(ingiriisi kaliya)*


→ Guji "How do I (Sidee ayaan u sameeyaa)" sanduuq
→ Hoos "Find" guji "edocs and forms (foomamka iyo edocs)"
→ Geli 6413 santuukha baarida ka dibna ku dhufo "geli" "enter"
→ Dhanka midig ee kore ku dhufo "geli" "inter" batoonka bogga labaad. Dukumiintiga ugu dambeeyaa waa midkan hadda aad ku jirto. Inta kale waxa ay leeyihiin waa Dhacay waqtigoodii "Riix" "Click" mowduuca dukumiintiga.

Ma aha **in aad** ka warbixiso isbedel kale oo dakhligaaga ku saabsan. Laakiin waxaa laga yaabaa in aad rabtid in aad ka war bixiso haddii dakhligaagu hoos u dhaco waxaa hoos u dhici kara garagaarka xanaanada caruurta ee la bixiyo.

**Jawdalka shaqada iyo dugsiga:** waa in aad soo sheegtaa haddii qof kasta oo qoyska ka mid ah uu si joogta ah u joojiyo shaqada ama dugsiga. Isbeddelada kale oo dhan ee ah jadwalka shaqada ama dugsiga waxaa ka soo warbixinaya:

1) Qoysaska la siiyo gargaarka xanaanada caruurta wax ka badan hal xanaano bixiye ilmihiiba.

2) Qoysaska ka hela Gargaar Xanaano Caruur meel sharci ah oo aan shati (ogolaansho) haysan, sida qof qoyska ka mid ah ama saaxiib la ah.



3) Qoysaska waalidkood u shaqeeyo xarun ay ogolaansho siisay DHS oo caruurta lagu xanaaneeyo ama xanaana bixiye ay qoratay Medicaid oo xanaaneeyo dadka khtaq siyaado ah leh.

qoysaska kale, way ka soo warbixin karaan haddii saacadaha ay shaqeeyaan ama dugsi aadan ay kororto, taasi waxay keenaysaa in ay kororto saacadaha loo ogolyahay Gargaarka Xanaanada Caruurta.

## Maxay tahay gargaarada kale ee aan heli karo kadib marka aan ka baxo MFIP?

Waxaa kaloo aad heli kartaa:

- Gargaar Caafimaad (MA) ama MinnesotaCare, oo ku xiran dakhligaaga.
- Gargaar Cunto, oo ku xiran dakhligaaga.
- Haddii dhib ku qabsado ka dib marka aad ka baxday MFIP, waxaa laga yaabaa in aad hesho Gargaar Deg-deg ah.

## Xagee kaloo ka heli karaa xanaanada caruurta?

Minnesota waxay leedahay kayd ciwaanada hay'adaha xanaanada caruurta iyo Shabaqadda isu Dirka meel kasta oo ka mid ah gobolka. Waxaad ka heli kartaa codsiga dhaqaalaha xanaanada caruurta, liiska meelaha caruurta lagu xanaaneeyo, iyo caawimaad kale, wac Khadka macluumaadka 1(888) 291-9811.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**